Maxaa dhacaya marka indhaha baaritaan buuxa lagu samaynayo?

Dhaqtarka wuxuu cunugaaga ka baarayaa:

- caafimaadka indhaha
- arRagga dheer iyo kan dhow
- arragga qotada dheer
- awoodda xoogsaaridda arrin
- isku toosinta indhaha

awoodda aragtida midabada

Ma ka jiraan dugsiyadda barnaamijyada baaritaanka indhaha?
Maya. Sababtaas awgeed ayay aad muhiim u tahay in waalidku caruurtooda geeyaan baaritaanka indhaha caadiga ah.

Cunugayga waxaa haysta dhibaato xagga arragtida laakiin ma doonayo in uu ookiyaale qaato. Maxaan sameeyaa?
Kala hadal macalinka cunuggaagu sidii aad iskula shaqayn lahaydeen si cunugaagu ugu dhiirogelin lahaydeen in uu ookiyaalihiisu ku xirto dugsiga iyo gurigaba. Ilmaha wayn waxay awoodi karaan in ay xirtaan muraayadda yar ee arragga hagaajiso ee isha barteeda la saaro.

Si aad u heshid dhaqtarka indhaha ee kuu dhow waxaad wacdaa 416 256 4411 ama booqo www.eyecareoao.com.

Calaamadaha Dhibaatooyinka Aragga

Dhibaatooyin badan oo la xiriira Aragtida waxa keliya oo lagu dareemi karaa, waa ayadoo la sameeyo baaritaanka indhaha oo buuxdo. Halka waxaan kusoo gudbinaynaa calaamadaha guud.

Cunnugaagu ma sameeyaa :

- ✓ TV ga hoosta ma ka galaa
- ✓ Dhib ma ku qabaa in calaamadaha meel fog ka akhriyo
- ✓ Madaxiisa/ madaxeedu dhinac ma u qaloociyaa
- ✓ Indhahiisa/ indhaheeda ma marmartaa
- ✓ Marar badan meelo ma ku dhacaa
- ✓ Hal il hoos ama kor ma u leexiyaa
- ✓ Ma qabaa madax xanuun, wareer iyo lalabo
- ✓ Ma ka leexdaa shaqo dhow

Marar badan ma ka dhuntaa meesha uu akhrinaayay ama akhrinaysay

Warqadaani waxaad ku heli kartaa luqadaha Carabi, Shiinays, Farsi, Korean, Portugese, Punjabi, Russian, Somali, Spanish, Tamil, Urdu, Vietnamese ee www.tdsb.on.ca

Aragti Wanaagsan Wuxuu Cunugaaga Ka Caawin Karaa in uu Dugsiga Ku Wanaagsanaado

Arragga Cunnugaagu Ma La Baaray?
Arragtida fiican waxay tahay qayb aad muhuum u ah awoodda waxbarashada. Ilmaha waxay u baahan yihiin arragti wanaagsan si ay sabuurada si waadax ah wax uga arkaan, buug u akhriyaan si buuxana uga qayb qaataan hawlaha fasalka ka socda.

Toronto District School Board · Toronto Public Health · Ontario Association of Optometrist · Toronto Catholic District School Board

Dhibaatooyinka araggu waxay keenaysaa in caruurta waxbarashadu ku adkaato. Baaritaanka joogtadda ah ee aragga waxay ka mid tahay u diyaargarowga dugsiga. Cunuggaaga araggiisa ma la baaray?
Dhibaatooyinka araggu waxay keenaysaa in caruurta waxbarashadu ku adkaato. Baaritaanka joogtadda ah ee aragga waxay ka mid tahay u diyaargarowga dugsiga. Cunuggaaga araggiisa ma la baaray?

Dhibaatooyinka aragga baaxaddeedu intay la eg tahay?

Dhibaatooyinka araggu waa kuwa aad u badan. Hal ka mid ah lixdii cunugba wuxuu qabaa dhibaato aragga. Kuwa badan aragtidooda weligood lama baarin.

Dhibaatada araggu ma waxyeellaynaysaa waxbarashada?

Haa. Boqolkiiba siddeetan (80%) carruurta waxa ay yaqaannaan waxay ku barteen indhaha. Ilmaha aan aragtidooda fiicnayn waxaa dhib ku noqon karta in ay shaqooyinkooda ahmiyad saaraan. Waxaa laga yabaa in ay niyad jabaan, dareemaanna in ay awooddoodu ka yar tahay tan ardayda

kale. Dhibaatooyinka aragga oo aan la dareemin iyo arrimo kaleba waxay keeni karaan dhibco hooseeya oo loogu qoro Warqadda Warbixinta Waxbarashadda (Report Card). Cunug kasta ee dhibaato dugsiga ka haysata waa in aragiisa la baaraa.

Goormaa ilmaha baaritaankooda indhaha ugu horreeya lagu samaynayaa?

Goormaa ilmaha baaritaankooda indhaha ugu horreeya lagu samaynayaa? Ilmaha inta aanay gaarin saddex sano waa in uu dhakhtarku si buuxda indhahooda u baaro, ka dibna sida ay dhakhtarradu ku talinayaan in la baaro hal ama labadii sanaba mar.

Cunuggaygu ma ii sheegi doonaa haddii uu dhibaato aragga ah qabo?



Waxaa laga yaabaa in uusan kuu sheegin. Ilmuhu badanaaba ma oga in ay qabaan dhibaato aragga ah Waxaa dhici karto in ay ku fekeraan in qof walba wax u arko sida ay iyagu wax u arkayaan.

Cunugaygu dugsiga wuu ku wanaagsan yahay. Ma wuxuu u baahan yahay baaritaan indhaha ah oo joogta ah?



Haa. Ilma badan waxay helaan habab adag oo ay ku shaqeeyaan si ay uga guulaystaan dhibaatada aragga. Cunugaagu waxaa laga yaabaa in uu ka sii fiicnaado haddii dhibaatadiisa aragga la saxo.

Yaa baari kara indhaha cunuggayga?

Dhakhtarrada indhaha ku takhasusay waxay qabaan tababbar gaar ah iyo qalab lagu ogaado in uu cunuggaagu si fiican wax u arkayo. Dhakhtarrada qoyska iyo kuwa carruurta waxay samayn karaan baaritaan yar. Dhakhtarrada indhaha ku takhasusay, dhakhtarrada qoyska iyo kuwa carruurtuba waxay cunuggaaga ka caawini karaan cudurrada indhaha iyo caafimaadka indhaha ee kale.

OHIP-ka ma bixinayaa kharashka baaritaanka ee indhaha?

Haa. OHIP-ka wuxuu bixinayaa sanadkiiba mar baaritaanka indhaha carruurta. Waxaad hubisaa in aad qaadatid cunuggaaga kaarkiisa caafimaadka marka aad u tagaysid dhakhtarrada indhaha ku takhasusay.

OHIP- ka ma bixinayaa Kharashka muraayadha indhaha?

Maya. Waxaad muraayadha indhaha ka gadan kartaa dhakhtarkaaga dukaammada muraayadha indhaha gado.indhaha ama